# Deyn Ayaad Igu Leedahay (I.O.U) Oo Laga Dhigo Deyn Qaadasho Qoraal Ah Oo Sharci Ah

Making an I.O.U. Legal - Promissory Notes

## Waa maxay deyn qaadasho qoraal ah?

Haddii aad lacag amaahato ama deymiso, waxaa wanaagsan in aad qoraal kala qorataan. Balanqaad deyn oo qoraal ah waa heshiis aad ku ogolaaneyso in aad dib u siiso lacagta qofkii ama ganacsiga. Balanqaadka deynta waa in ay ku faahfaahsan yihiin waxyaabaha ay ka mid yihiin goorta iyo sida lacagta lagu bixinayo, haddii uu jiro dulsaar lacagta lagugu leeyahay iyo waxyaabaha dhici kara haddii aadan lacagta bixin.

Deynta qoraalka waxaa kale oo lagu magacaabaa **deyn qoraal ah (note payable) ama (deyn lagu gorgortami karo**)

Haddii aad tahay qofka lacagta lagu leeyahay waxa aad tahay **balan qaade, sameeye ama deyn qaate sharci ahaan.**

Haddii aad tahay qofka lacagta amaahiyey **loo balan qaade, bixiye ama deyn bixiye.**

Lacagta amaahda ah waxaa lagu magacaa lacagta **asalka** (deynta).



Haddii warqadda balanqaadka si sax ah loo sameeyey, waa sharci maxkamaduna waa ay oofin kartaa. Akhri qeybta hoose ee "**waa maxay waxyaabaha lagu qoro deynta qoraalka ah?"** Deynta qoraalka ah waxaa loo isticmaalaa deynta shaqsiga ah, tan ganacsiga iyo tan lagu iibsado hantida ma guurtada ah.

Deynta qoraalka ah way ka duwan tahay deyn ayaad igu leedahay (IOU) waayo deynta qoraalka ah waxaa ku cad ciida lacagta dib u bixineysa iyo sida loo bixinayo iyo goorta la bixinayo iyo faahfaahin kale oo dheeraad ah. I.O.U waxaa lagu bixiyaa deynta uu qof ku leeyahay qof kale.

## Goorma ayaan isticmaali karaa deynta qoraalka ah?

Haddii aad lacag ka amaahato bangiga, bangigu waxa uu inta badan heystaa qoraal deynta ah oo aad saxiixday. Bankigu waxa uu ku siinayaa foom ay iyagu leeyihiin oo ay ku xusan shuruudaha iyo qodobada deynta qoraalka ah.

Inta badan kama gorgortami kartid qodobada ku xusan. Si taxadar leh u akhri oo ku dadaal in aad fahamto qodobada uu ka kooban yahay heshiiska, iyo waxa dhacaya haddii aadan ka soo bixin. Weydii bankiga haddii qodobada qaar ka mid ah wax laga bedeli karo haddii ay jirto sabab wanaagsan oo aad sidaas ugu baahan tahay. Sabab wanaagsan waxaa noqon kara haddii bangigu doonayo in deynta la bixiyo 1da bil kasta laakiin aadan qaadan mushahar wixii ka horeeya 5ta bisha.

Marka saaxiibada iyo qoysasku lacag is amaahiyaan , inta badan qoraal ma kala qortaan, sida goorta la bixinayo iyo sida loo bixinayo. Deynta qoraalka waxa uu ka caawiyaa dadka in ay cad yihiin qodobada lagu heshiiyo, taasoo ay qof kasta ay u cadahay.



### Deynta qoraalka waxa ay noqon kartaa mid leh damaanad ama mid aan damaanad laheyn.

Damaanad waxaa loola jeedaa qof deynta qaadanaya oo ogolaada “waxyaabo loo qaadan karo” ama rahmad Waxa ay ka dhigan tahay, adiga oo soo bandhiga waxyaabo qiime leh sida gaariga oo kale oo haddii aadan deynta dib u bixin, uu deyn bixiyuhu qaadan karo deyntaada si uu ugu bixiyo deynta.

Aan damaanad laheyn waa deyn aan rahmad lagu bixiyo laheyn. Haddii aad qof lacag amaahiso adiga oo aan ka qaadan wax damaanad ah oo ay bixin waayeen deynta, ma jiraan wax qiime leh oo aad heysato si aad ugu qaadato deynta. Waad dacweyn kartaa si aad u hesho lacagtaada, xataa haddii aad guulaysato, waxaa dhici karta inay adkaato inaad dhabtii lacagta aad hesho.

### Waa maxay waxyaabaha lagu qoro deynta qoraalka ah?

Waa in qoraalku deyntu yahay mid si gaar ah loo faahfaahiyey. Sida ay maxkamaddu u dhaqan gelin karto heshiiska.

Guud ahaan, qoraalka deynta waxaa ka mid ah:

- Magaca sadexan (ku qoran aqoonsiga), cinwaanka iyo telefoon lambarka qof kasta ama shirkada kasta oo qeyb ka ah.
- Inta ay deyntu le’eg tahay.
- Goorta deynta dib loo bixinayo. Waxa ay noqon kartaa mid mar la wada bixiyo ama taariikho kala duwan ama lagu qoro “markii la codsado” Waxaa kale oo laga dhigi karaa mid tartiib tartiib loo bixiyo. Haddii dhawr jeer la bixinayo, waa in la qoraa taariikhda la bixinayo iyo lacagta mar kasta la bixinayo.
- Haddii aad ku heshiiseen dulsaar, qor inta uu noqonayo dul saarka deynta. Ka digtoonoow. Haddii aadan aheyn bangi, waxaa jira xad u go’an dulsaarka aad dulsaaran karto deymaha.
- Cadadka guud ee ugu dambeeya waa in dib la bixiyaa ka dib kolka lagu daro dulsaarka cadadkii hore ee amaahda ahaa. Taasi waa deynta asalka + dulsaar.

- Qodobada la isku raacay Maxaa dhacaya haddii deynta dib loola dhaco ama aan la bixin gebi ahaanba? Tusaaale ahaan: Ma jirtaa lacag la dul saarayo haddii bixinta dib loola dhaco? Imisa ayaa qofku aanu bixin deynta inta aan la qaadin wax talaabo ah? Sidoo kale, haddii ay jiraan qodobo kale oo lagu heshiiyey, maxaa dhacaya haddii aan laga soo bixin?

- Saxiixa dhinacyada iyo taariikhda la saxiixay qoraalka deynta.



## U akhri qoraalka deynta si taxadar leh!

Mar kasta oo aad saxiixdo qoraal sharci ah, sida qoraalka deynta, si taxadar leh u akhri. Qaar ka mid ah qoraalka deynta, gaar ahaan deymanka bangiyada, inta badan way adag tahay in la fahmo. Halkan waxaa ku xusan qaar ka mid ah waxyaabaha ku xusan qoraalka deynta bangiyada:

  - “Qodobka dadajinta” Taasi waxa ay ka dhigan tahay waa in aad bixisaa deynta oo dhan haddii aad “jabiso shuruudaha.” Waxaa laga yaabaa in deyn bixiyuhu ku qoro mid ama laba jeer oo aad seegto bixinta waa adiga oo jabiyey shuruudaha.

  - Waa inaad hubisaa in aad isla fahamsan tihiin sida loo qeexay ereyga “jabiyey shuruudaha.” Waxa aad u baahan tahay in aad ogaato waxa loola jeedo jabiyey shuruudaha ee lacag bixinta.

    Haddii aan horey loogu sheegin qoraalka deynta, weydii deyn bixiyaha in uu ku daro“ muddo dheeraad ah” ama “xilliga ka soo kabashada.” Tani waxa ay ku siineysaa waqti dheeraad ah oo ka baxsan xilliga lacagta lagaa doonayo in aad bixiso. Marba haddii aad bixiso lacagta mudada dheeraadka ama xilliga ka soo kabashada, ganaaxa la daahidda dusha lagaama saarayo.

- Waa in aad hubisaa in lacag dheeraad ah aan lagaa qaadeyn “lacagta oo aad horey u bixiso.” Taasi waxa ay ka dhigan tahay in kharash dheeraad ah lagaa qaadayo haddii aad dooneyso in aad deynta xilli hore bixiso. Haddii deyntu ay tahay mid guri ku qaadasho (mortgage) ah, ganaaxa ah horey u sii bixinta dayntaasi waxaa dhici karta inuusan marmarka qaarkood sharci ahayn.

  Tusaale ahaan, ganaaxa horey u sii bixinta amaah guri (mortgage) waxaa dhici karta inysan sharci ahayn haddii:
    – aad wada bixinayso deynta ka hor 42 bilood (3 ½ sanno) ka dib kolkii aad qaadatay deynta
    – ganaaxu uu ka badan yahay 2% lafaha aan la bixin AMA in ka badan dulsaarta 60 cisho la bixin lahaa, hadba kii yar.

  Haddii deyntu (mortgage) ay leedahay shuruud ah ganaaxid haddii horey loo sii bixiyo, la tasho qareen si aad u hubiso inay sharci tahay.

## Qodobada Kale

- **Maxaa dhacay haddii uu jiro wax ka badan hal deyn bixiye?** Haddii wax ka badan hal qof uu lacagta laga amaahdo "iyaga oo wadaaga ayaa mid walba goonidiisa mas'uul uga yahay" Taasi waxa ay ka dhigan tahay haddii uu mid ka mid ah joojiyo inuu bixiyo deynta, waa inuu qofku bixiyaa dhamaan deynta oo dhan. Xitaa haddii adiga iyo qofka kale aad isku racdaan in aad deynta kala qeybsataan, deyn bixiyuhu wuu kugu dacweyn karaa deynta oo dhan.

- **Maxaa dhacaya haddii aan doonayo in aan wax ka bedelo qoraalka deynta ka dib marka aan saxiixay?** Haddii adiga iyo dhinaca kale aad isku raacdaan isbedelka, qoraal ka dhiga oo heshiis cusub qora. Heshiiska cusub, waa in lagu sheegaa haddii uu bedelayo heshiiskii hore ama inuu yahay isbed lagu sameeyey qoraalkii deynta ee asalka ahaa. Akhri deyntii asalka aheyd si aad u ogaato in ay ku fareyso waxyaabo lagaa doonayo in aad sameyso oo ka dhashay isbedelka.

- **Waa maxay bixinta deynta ee tan ugu dambeysa mar la wada bixiyo (balloon payment)?** Waa nooc ka mid ah jadwalka bixinta lacagta. Waxa aad bixineysaa lacag yar bishiiba iyo hal mar oo ugu dambeeya oo aad bixineyso deynta oo dhan. Ka feejignoow in aad ogolaato marka ugu dambeysa oo lacagta oo dhan aad wada bixiso. Waa in aad xaqiijisaa in ay ku soo galeyso lacag kugu filan oo aad ku bixiso tan ugu dambeysa, uguna badan.



- **Siddee ayaan u oofiyaa qoraalka balanqaadka ah?** Haddii aad la gashay qoraal balanqaad ah ruux uusana bixin lacagtii lagu balamay inay ku siiyaan, waa aad dacaweyn kartaa qofkaa. Haddii aad qofkaa ku leedahay lacag ka yar $20,000 ama ka yar, waxa aad ka dacaweyn kartaa qofkaa maxkamadaha Dhexdhexaadinta ('Qaamaha Yaryar'). Ka akhri warqadayada xogta aruursan ee *Maxkamadaha Dacwadaha Madaniga* wixii akhbaar ah ee dheeraadka ah. Haddii aad ku leedahay qofka lacag ka badan $20,0000, waxaad kaliya oo aad ka dacaweyn kartaa Maxkamadda Degmadda. Xeerarka Maxkamadda Degmaddu waa ay dhib badan yihiin. Waa ra'yi fiican inaad la tashato qareen. Hay'adda u Gudbinta Qareenada ee Minnesota iyo Adeega Akhbaarta [Minnesota Lawyer Referral and Information Service (MNLRIS)] ayaa kaa caawin karta helida qareen aad qabsato. Waxaa jira khidmad la bixiyo si loo adeegsado adeegan.

- **Ma leeyahay xaquuqo kale haddii qoraalka balanqaadka ahi uu ahaa deynta guryaha lagu qaato ama qandaraaska guri gadasho (kiro-lahaansho)?** Haa. Ka akhri warqadayada xogta aruursan ee *Maxaad Dooneysaa Inaad Ka Ogaato Kirada Marka Dambe Aad Mulkiyadda La Wareegto Iyo Heshiiska Mulkiyadda* iyo *Xuquuqdaada marka maxkamad amarto in gurigaaga lala wareego* wixii kale ee akhbaar ah ee dheeraad ah.

*Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**